Codsiga Gargaarka Lacagta Kaashka ah ama Cuntada

Application for Cash or Food Assistance

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo akhriska ama buuxinta foomkan, fadlan caawimaad ina weydiiso. Boggan u hayso diiwaannadaada ahaan.

Sideen u codsadaa gargaarka lacagta kaashka ah ama cuntada?

Waxaad **bilaabi** kartaa hannaanka hadda adiga oo qof ahaan u geynaya codsigan xafiiska adeegyada bulshada. Codsiga waa in ay ku qoran yihiin magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga ama saxiixa wakiilkaaga idman. Waxaad codsigaaga u gudbin kartaa si degdeg ah xitaa haddii ay kaliya ku jiraan walxahan soo socda.

- Waxaad heli kartaa dheefo dheeraad ah ama goor dhow hel haddii aad buuxiso foomka adiga oo ka jawaabahaya su'aalaha, saxiixaya bogga lixaad oo innoo siinaya codsigaaga iyo macluumaad kastoo kale ee aan ku weydiinno sida ugu dhaqsiyaha badan ee aad u awoodo.
- Waxaad codsigaaga geyn kartaa xafiis degaanka ku yaala. Eeg www.dshs.wa.gov goobaha.
- Fakis ahaan ugu dir codsigaaga 1-888-338-7410
- Boostada ugu dir codsigaaga cinwaankan soo socda:

  DSHS
  CSD-Customer Service Center
  PO Box 11699
  Tacoma, WA 98411-6699
- Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa barta internet-ka www.washingtonconnection.org
- **Caymiska daryeelka caafimaadka waa in aad ka codsataa midkood bartan internetka www.wahealthplanfinder.org**, adiga oo wacaya **1-855-923-4633**, ama adiga oo adeegsanaya Codsiga HCA ee Caymiska Daryeelka Caafimaadka (HCA 18-001).

Waa sidee sida ugu dhaqsiyaha badan ee aan u heli karo caawimaadda gargaar lacagta kaashka ah iyo cuntada?

Haddii aad si degdeg ah ugu baahan tahay gargaar cunto, buuxi Su'aalaha 1aad ilaa 14aad ka-dibna foomkan waxaad geysaa xafiiskaaga degaanka.

Waxaan ku go'aaminaa haddii aad xaq u leedahay gargaar cunto *7 maalmood gudahooda* haddii aad muujiso caddeynta aqoonsigaaga *kana soo baxdo* mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Reerkaaga wuxuu heli doonaa wax ka yar dakhli guud ahaan $150 ah iyo wax ka yar $100 kheyraad la lacageyn karo ah bishan.
- Dakhliga iyo kheyraadka reerka waxaa ay ka yar yihiin kirada iyo adeegyadaada bil kasta.
- Reerkaaga waxaa ka mid ah muhaajir sabool ah ama shaqaale xilliyeed beeraha ka shaqeeya.

Dheefaha waxaa la bixiyaa maalinta ka-dib marka aan go'aamino in aad xaq u leedahay. Waa in aan go'aaminaa haddii aad xaq u leedahay Gargaar Cunto muddo 30 maalmood gudahooda ee ka-dib taariikhda aad codsigaaga soo gudbiso. Gargaarka cuntada ayaa caadi ahaan bilowda maalinta aan codsigaaga helno. Haddii aad codsigaaga ka soo gudbinayso xarun aad ku jirto, taariikhda bilowga waa taariikhda siideyntaada ama ka soo bixintaada. Gargaarka kaashka ayaa caadi ahaan bilowda maalinta aan helno dhammaan macluumaadka si aan u go'aamino in aad xaq u leedahay.

Xuquuqaha Madaniga iyo Takoor La'aanta

Iyada oo la raacayo sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo xeer-nidaamyada iyo siyaasadaha xuquuqaha madaniga ah ee USDA, USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadeeda, shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qaybqaata ama maamula barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal ahaan qaranka uu ka soo jeedo, diinta, jinsiga, naafonimo, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska/waalidka, dakhliga laga helay barnaamijka gargaarka dadweynaha, aaminsanaan siyaasadeed, ama aargudashada ama ciqaabta ka dhalata ka qaybgal hore oo la xiriira xuquuqda madaniga ah, barnaamij ama waxqabad kasta ee uu qabto ama maalgeliyo USDA (inkasta oo dhammaan sababaha kor ku xusan aysan si siman u khusayn barnaamij kasta). Xalka iyo muddada kama dambaysta ah ee cabashada la gudbin karo ayaa ku kala duwan barnaamij ama dhacdo kasta.

Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab war-isgaarsiineed kale oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (t.a., Farta Indhoolayaasha ee Braille, daabacad waaweyn, cajalad cod ah, Luuqadda Dhegoolayaasha ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la soo xiriiraan gobolka ama hay'ad degaanka ah ee maamusha barnaamijka ama hakala xiriirto USDA Adeegga War-lalinta Isgaarsiinta lambarkan 711 (cod iyo TTY). Intaa waxaa dheer, in macluumaadka barnaamijka lagu heli karo luuqado kale oo aan Af-Ingiriis ahayn.

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Taloorka ee Barnaamijka USDA, AD-3027, laga helo barta internetka ee Sida Loo Soo Gudbiyo Cabashada Takoorka Barnaamijka iyo xafiis kasta ee USDA ama qor waraaq ku socota USDA ka-dibna waraaqda ku qor dhammaan macluumaadka lagu codsadey foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda ku socota USDA:

1. **Boostada ugu dir**: USDA Food and Nutrition Service, 1320 Braddock Place, Room 334 Alexandria, VA 22314; ama
2. **Email ugu dir**: FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov.

Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.

Xaaladda Socdaalka iyo Lambarrada Damaannada Bulshada

Waxaa laga yaabaa in aad awoodo in aad hesho gargaarka dadka qaar ee aad la nooshahay xitaa haddii dadka kale ee aad la nooshahay aysan caawimaad heli karin iyada oo ay sabab u tahay xaaladda socdaalka. Waa in aan noo sheegtaa xaaladda socdaalka qof walba ee soo codsada. Xaaladda shisheeyaha ee xubnaha qoyska codsadaha waxaa ku waajiba in uu xaqiijiyo USCIS (oo horey loo oran jiray INS) iyadoo loo marayo soo gudbinta macluumaadka codsiga loo diray USCIS. Macluumaadka laga helay USCIS, oo ku saleysan soo gudbintan, ayaa waxaa ay saameyn kartaa xaddiyada dheefaha iyo xaq-u-yeelashada.

Si waafaqsan Sharciga Federaalka (45 CFR §205.52, 7 CFR §273.6), Waa in aad inna siisaa Lambarka Damaannada Bulshada (SSN) ee qof walba ee aad la nooshahay ee codsadey TANF, ama gargaarka cuntada. Waxaan sidoo kale u baahan karnaa SSNs-yada waalidiinta iyo xaasaska kula nool laakinse aan codsan.

Haddii aad codsaneyso Gargaarka Cuntada iyo barnaamijyada kale

Waa in aad raacdaa xeerarka SNAP ee loogu talagalay ka shaqeynta codsigaaga. Tani waxaa ka mid ah in codsiga looga shaqeeyo xadka waqtiga gudahiisa, iyada oo la bixinayo ogeysiisyo habboon, oo kuu sheegaya xuquuqahaaga maamulka. Ma diidi karno Gargaarkaaga Cuntada iyada oo ay sabab u tahay in codsigaaga barnaamijyada kale ee gargaarka in la diiday.

Asturnaanta iyo Gargaarka Lacagta Kaashka iyo Cuntada

Xeerka Cuntada iyo Nafaqada 2008, ee wax-ka-beddelka laga sameeyay, wuxuu waaxda u oggol yahay in la ururiyo macluumaadka aan ku weydiisano codsiga, oo uu ku jiro SSN-ka xubin kasta oo reerka ka tirsan. Waxaan SSNs u isticmaalnaa in aan ku eegno aqoonsiga, ku xaqiijino xaq-u-yeelashada, kaga hortagno khiyaannada, iyo in aan ku ururino xaq-sheegashooyinka. Waxaan macluumaad isdhaafsanaa hay'adaha kale si aan u maareyno barnaamijyadeenna iyo si aan u raacno shuruucda. Bixinta macluumaadka la codsadey waa ikhtiyaari. Haseyeeshee, ka gaabinta bixinta SSN ama caddeynta codsiga SSN ee aan sababta wanaagsan lahayn waxaa ay keeni kartaa u diidista gargaarka Cuntada Aasaasiga ah ee shakhsi kasta ee ka gaabiya bixinta SSN. Waxaan macluumaadka qaar ku xaqiijinaynaa barnaamijyada iswaafajinta xogta kombiyuutarka, oo uu ku jiro Nidaamka Xaqiijinta Xaq-u-yeelashada iyo Dakhliga (IEVS) ee federaalka.

Macluumaadka loo sheegay Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada waxaa ay saameyn karaan xaq-u-yeelashada caymiska daryeelka caafimaad ee ay gacanta ku hayaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Health Benefit Exchange.

Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkan in aan:	Waxaa laga yaabaa in aan macluumaadkan bixino:
• Si loo go'aamiyo cidda xaqa u leh barnaamijyadeenna. • Si loo soo ururiyo lacag-bixinnada dheeriga ah. • Si loo maareeyo barnaamijyadeenna. • Si loo hubiyo in aan raacno sharciga.	• Si hay'adaha gobolka iyo kuwa federaalka ay rasmi ahaan ah u adeegsadaan. • Si ay u adeegsadaan Hay'adaha Sharci Fulinta ee ku dabajira dadka cararaya si ay uga fogaadaan sharciga. • Si ay u adeegsadaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee soo ururinta si ay u soo ururiyaaan lacag-bixinnada dheeriga ah ee gargaarka cuntada.

Digniinta Ciqaabta ee Barnaamijka Gargaarka Cuntada

Waxaan ka xaqiijinnaa hay'adaha kale in macluumaadkaagu uu sax yahay. Haddii macluumaadka uu wax ka khaldan yahay, shakhsiyaadka codsanaya waxaa laga yaabaa in aysan helin Gargaarka Cuntada.

Xubin kastoo si ula-kac ah u jebisa mid ka mid ah xeerarkan waxaa:

- Lagu soo oogi karaa dembi iyada oo la raacayo shuruucda Gobolka iyo kuwa federaalka.
- Laga joojin karaa SNAP muddo hal sano ah ilaa si joogto ah.
- Lagu ganaaxi karaa ilaa $250,000.
- Lagu xukumi karaa xabsi gaaraya ilaa 20 sano.
- Laga joojin karaa SNAP 18 bilood oo dheeraad ah haddii ay maxkamaddu amarto.

Haddii maxkamad ay dembiga kugu hesho:

Qaadashada dheefaha macaamulaadka ku lugta leh:	Waxaa laga yaabaa:
• Iibka maado la kontaroolo	In aadan xaq-u-yeelan muddo laba sano ah ilaa si joogto ah.
• Iibka hub, rasaas, ama waxyaabo qarxa	Si joogto ah ayaa lagaaga joojin doonaa.
• Ka ganacsiga dheefo ka badan $500 oo isku jir ah	Si joogto ah ayaa lagaaga joojin doona.
• Khiyaanno aqoonsi ama degganaansho	Muddo 10 sano ah ayaa lagaa joojin doonaa.

Codsiga Gargaarka Lacagta Kaashka iyo Cuntada

Application for Food and Cash Assistance

Inna weydiiso haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomkan.

Haddii aadan awoodin in aad maanta buuxiso foomkan, hannaanka bilow adiga oo soo gudbinaya **magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga**. Waxaad weli u baahan doontaa in aad codsiga buuxiso ka hor inta dheefaha aan la ansixin. **Saxiixa bogga lixaad ayaa loo baahan yahay in lagu buuxiyo codsiga.**

1. MAGACA KOOWAAD XARAFKA HORE EE MAGACA DHEXE MAGACA DAMBE	SAXIIXA CODSADAHA AMA WAKIILKA IDMAN	2. LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA (HADDII LA GARANAYO)
3. CINWAANKA WADDADA HALKA AAD KU NOOSHAHAY MAGAALADA GOBOLKA KOODHKA DEGAANKA		4. LAMBARKA TELEFOONKA AASAASIGA AH ☐ TELEFOONKA GACANTA ☐ GURIGA ☐ FARRIINTA
5. CINWAANKA BOOSTADA (HADDII UU KA DUWANYAHAY) MAGAALADA GOBOLKA KOODHKA DEGAANKA		6. LAMBARKA(-DA) TELEFOONKA EE LABAAD ☐ TELEFOONKA GACANTA ☐ GURIGA ☐ FARRIIN
8. Waxaan codsanayaa (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon): ☐ Lacag kaash ah ☐ Cunto ☐ Daryeelka carruurta		7. CINWAANKA EMAIL-KA

9. Aniga ama qof reerkeyga ka tirsan (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):
   ☐ Oo ku jira xaaladda tacaddiga reerka ka dhexdhaca ah ☐ Naafonimo leh
   ☐ Aan shaqeyn karin iyada oo ay sabab u tahay dhibaatooyin caafimaad ☐ Uur leh; magaca: _____
   taariikhda la filayo: _____
10. Lacag intee le'eg ayaad filaysaa in reerkaagu helo bishan? $_____
11. Lacag intee le'eg ayuu reerkaagu u haystaa kaash ahaan ama ugu jirtaa akoono banki? $_____
12. Lacag intee le'eg ayuu reerkaagu ku bixiyaa kiro ama lacagaha deynta guriga? $_____
13. Waa maxay adeegyada (korontada, gaaska iwm) uu lacagtooda bixiyo reerkaaga? ☐ Kululeynta/qaboojinta
    ☐ Telefoonka ☐ Waxyaabo kale: _____
14. Ma jiraa qof reerkaaga ka tirsan oo ah shaqaale xilliyeed beeraha ka shaqeeya ama muhaajir? ☐ Haa ☐ Maya
15. Haddii aad codsaneyso gargaar cunto, immisa qof oo reerkaaga ku sugan ayaa cunto u soo iibisaa ama u diyaarisaa? _____
16. Haddii aad codsaneyso daryeelka carruurta, waa maxay waxqabadka aad daryeelka ugu baahan tahay (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon)?
    ☐ Shaqo ☐ Iskuul ☐ WorkFirst ☐ Shaqada iyo Tababarka Cuntada Aasaasiga (BFET)

FOR OFFICE USE ONLY – Household eligible for expedited service: ☐ Yes ☐ No Screener's Initials: _____ Date: _____

17. ☐ Waxaan u baahanahay tarjumaan. Waxaan ku hadlaa: _____ ama ☐ saxiix; ka-dibna waraaqaheyga u tarjun: _____

18. Qor qof kasta oo ka tirsan reerkaaga xitaa haddii aadan u codsaneynin (ku soo lifaaq xaashiyo dheeraad ah, haddii loo baahdo).

MAGACA (MAGACA KOOWAAD, DHEXE, DAMBE)	JINSIGA	SIDEEBUU QOFKAAN KUULA XIRIIRAA?	TAARIIKHDA DHALASHADA	CALAAMADEE HADDII AAD DHEEFO U RABTO QOFKAN	IKHTIYAARKA LOOGU TALOGALAY DADKA AAN CODSADAYAASHA-AHAYN			
					LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA	EEG HADDII UU YAHAY MUWAADIN MAREYKANAH	ISIRKA (EEG TUSAALOOYINKA HOOSE)	MAGACA QABIILKA (Loogu Talagalay Dadka U Dhashay Hinddida Maraykanka Ah, Dadka U Dhashay Alaska)
		Aniga nafsadayda		☐		☐		
				☐		☐		
				☐		☐		
				☐		☐		
				☐		☐		
				☐		☐		

19. Asal ahaan isirka aan ka soo jeedo waa Hisbaanik ama Laatiino: ☐ Haa ☐ Maya

Macluumaadka raadraaca Isirka iyo Sinjiga waa ikhtiyaari oo ma saameyn doonaan xaq-u-yeelashada ama xaddiga dheefta. Macluumaadkan waxaa loo adeegsadaa hubinta in dheefaha barnaamijka la qaybiyo iyada oo aan la eegayn isirka, midabka, ama asal ahaan qofka meesha uu ka soo jeedo. Gargaarka Cuntada, USDA wuxuu nooga baahan yahay in aan jawaab ku siino haddii wax macluumaad ah aan lagu siin. Waxaan dooran doonnaa "aan la soo sheegin" haddii aadan doonayn in aad ka jawaabto. **Tusaalooyinka Isirka:** Caddaan, Madow ama Afrikaan Maraykan ah, Aasiyaan, Asal ahaan u dhashay Hawaiian, Degane Jasiirad Baasifik, Maraykan Hindi ah, Asal ahaan u dhashay Alaska, ama isiro kastoo isku jir ah.

Barcode label

14001

MAGACA CODSADAHA	LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA

I. Macluumaad Guud

1. 30-kii maalmood ee la soo dhaafay, waxaan lacag kaash ah ama cunto ka helay gobol, qabiil, ama ilo kale. ☐ Haa ☐ Maya
2. Qof aan u codsanayo ayaa ku nool dibadda Gobolka Washington: ☐ Haa ☐ Maya Waa kuma: _____
3. Aniga ama qof reerkeyga ka tirsan ayaa ah qof shisheeye ah oo la taabogaliyay: ☐ Haa ☐ Maya Waa kuma: _____
4. Aniga ama qof reerkeyga ka tirsan oo da'diisu tahay 16 ama ka weyn ayaa ku jira (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon): ☐ Dugsi Sare ☐ Barnaamij U Dhigma Dugsi Sare ☐ Jaamacad ☐ Iskuul ganacsi Waa Kuma: _____
5. Qof ayaa si ku-meelgaar ah gurigeyga uga maqan: ☐ Haa ☐ Maya waa kuma: _____
6. Aniga ama qof gurigeyga jooga ayaa ka tirsanaan jiray Ciidamada Qalabka Sida ee Mareykanka, Ilaalada Qaranka, ama Ciidamada Kaydka ama wuxuu ahaa qof ku tiirsan ama xaaska qof ka tirsanaan jiray: ☐ Haa ☐ Maya Haddii ay haa tahay, waa kuma: _____
7. Aniga ama qof aan u codsanaya ayaa ka cararaya sharciga si aan uga fogaano in aan maxkamad ama jeelka u aadno dembi culus: ☐ Haa ☐ Maya
8. Waxaan ku noolahay: ☐ Gurigeyga ama waaxdeyda ☐ Guri Kooxeed ☐ Wax Kale: _____ ☐ Xarunteyda (qor nooca): _____ Taariikhda la geliyay: _____
9. Aniga: ☐ Aan Guursan ☐ Guursadey ☐ La Furay ☐ Kala Tageen ☐ Carmalow ☐ Ku jira Iskaashi Guri oo Diiwaangashan
10. Aniga ama qof ka tirsan reerkeyga ayaa waxaa lagu helay in uu Gargaar Cunto ku beddeshay daroogo kadib 22ka Sibtembar, 1996: ☐ Haa ☐ Maya
11. Aniga ama qof ka tirsan reerkeyga ayaa waxaa lagu helay iibsashada ama iibinta Gargaar Cunto oo ka badan $500 kadib 22ka Sibtembar, 1996: ☐ Haa ☐ Maya
12. Aniga ama qof ka tirsan reerkeyga ayaa waxaa lagu helay in uu Gargaar Cunto ku bedeshay hub, rasaas, ama waxyaabo qarxa kadib 22ka Sibtembar, 1996: ☐ Haa ☐ Maya
13. Aniga ama qof ka tirsan reerkeyga ayaa waxaa lagu helay in uu Gargaar Cunto ka qaadanaya in ka badan hal Gobol kadib 22ka Sibtembar, 1996: ☐ Haa ☐ Maya
14. Aniga ama qof gurigeyga jooga: a. Ayaa shaqo joojin ku jira: ☐ Haa ☐ Maya b. Ayaa qof hoy iyo cunto ka helo guriga: ☐ Haa ☐ Maya

II. Kheyraadyada (Ku Lifaaq Caddeyn; Loogu Talagalay Gargaarka Lacagta Kaashka ah oo Kaliya)

Isha dhaqaale waa wax kasta oo adiga laguugu leeyahay ama aad iibsanaysid midkaas oo la iibin karo, ganacsi loo bedeli karo, ama loo wareejin lacag caddaan ah oo ay haystaan dadka kale. Isha dhaqaale ka mid ma ahan hantida shakhsiyeed sida qalabka guriga, ama dharka. Tusaaalooyinka ilaha dhaqaale waa:

- Lacag caddaan ah
- Akoonnada jeegga
- Akoonnada kaydka
- Maaliyadaha kulliyadda
- Ammaanp
- IRA / 401k
- Guryo, Dhul ama Dhismeyaal
- CDs-yo
- Akoonka suuqa lacagaha
- Curaar
- Lacag hawlgabnimo
- Maaliyadaha duugta, qorsheyaasha lacagtooda la horumariyo
- Qalab ganacsi
- Xoolo
- Caymis nololeed

1. Fadlan qor ilaha dhaqaale ee adiga, xaaskaaga, ama qofkale oo aad u codsanaysid midkaas oo leh ama iibsanaya:

KHEYRAADYADA	KUMAA ISKA LEH	GOOBTA	QIIMAHA
			$
			$
			$

2. Aniga, xaaskeyga, ama qof aan u codsanayo ayaa haysta baabuur, gawaari xammuul ah, gawaari qafilan, duumo, RVs, rimooro, ama gawaari kale:

SANADKA (TUSAALE, 1980)	SHIRKADDA SAMEYSAY (TUSAALE, FORD)	MOODEELKA (TUSAALE, ESCORT)	CALAAMADEE HADDII UU KIRO YAHAY	CALAAMADEE HADDII GAWAARIDA LOO ADEEGSADO UJEEDDOOYIN CAAFIMAAD	XADDIGA LACAGEED EE LAGAA DOONAYO
			☐	☐	$
			☐	☐	$
			☐	☐	$

3. Aniga, xaaskeyga, ama qof aan u codsanayo ayaa iibiyay, ka ganacsadey, bixiyay, ama wareejiyay kheyraad labadii sano ee ugu dambeeyay (oo ay ku jiraan ammaano, gawaari ama xuquuq nololeed): ☐ Haa ☐ Maya Haddii ay haa tahay, waa maxay: _____ waa goormaa: _____

III. Lacagaha go'an ee sannad ahaanta loo bixiyo (Maalgashiyada uu sameeyay xubin qoys kasta si uu u helo lacag-bixinno joogto ah hadda ama mustaqbalka ah.)

YAA ISKA LEH LACAGTA GO'AN EE SANNAD AHAANTA LOO BIXIYO?	SHIRKAD AMA HAY'AD?	XADDIGA AMA QIIMAHA	DAKHLIGA BILLAHA AH	TAARIIKHDA LA IIBSADEY
		$	$	
		$	$	
		$	$	

MAGACA CODSADAHA	LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA

IV. Dakhliga La Kasbadey (Ku Lifaaq Caddeynta)

1. Aniga, xaaskeyga, ama qof aan u codsanayo ayaa lahaa shaqo dhammaatey 30 maalmood ee la soo dhaafey: ☐ Haa ☐ Maya
2. Aniga, xaaskeyga, ama qof aan u codsanaya ayaa dakhli ka hela shaqo: ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ay haa tahay, fadlan buuxi qaybtan:

KUMAA KASBADA DAKHLIGAN MAGACA SHAQAALAHA IYO LAMBARKA TELEFOONKA TAARIIKHDA BILOWGA Shaqadan ma tahay shaqo iskaa-u-shaqeysi ah? ☐ Haa ☐ Maya Xaddiga kharashka iskaa-u-shaqeysiga ee bil kasta: $____	XADDIGA GUUD EE LA HELAY (XADDIGA LACAGTA KA HOR KA JARIDDA) $_____kasta: ☐ Saacad ☐ Toddobaad ☐ Laba toddobaad ☐ Laba-jeer bishii ☐ Bil Saacadood toddobaad kasta: _____ Taariikhda mushaaraadka (t.a., 1aad iyo 15aad, ama Jimco kasta):
KUMAA KASBADA DAKHLIGAN MAGACA SHAQAALAHA IYO LAMBARKA TELEFOONKA TAARIIKHDA BILOWGA Ma tahay shaqadaan shaqo-shakhsiyeed? ☐ Haa ☐ Maya Xaddiga kharashka iskaa-u-shaqeysiga ee bil kasta: $____	XADDIGA GUUD EE LA HELAY (XADDIGA LACAGTA KA HOR KA JARIDDA) $_____kasta: ☐ Saacad ☐ Toddobaad ☐ Labo toddobaad ☐ Laba jeer bishii ☐ Bil Saacadood toddobaad kasta: _____ Taariikhda mushaaraadka (t.a., 1aad iyo 15aad, ama Jimco kasta):

V. Dakhli Kale (Ku Lifaaq Caddeynta; Warbixinta loogu talagalay Dhammaan Xubnaha Reerka)

- Dheefaha shaqo la'aanta
- Lambarka Damaannada Bulshada
- Dakhliga qabiilka
- Dakhliga ciyaaraha
- Dheefaha waxbarashada (deymaha ardeyga, deeqaha, shaqada - waxbarashada)
- Dakhliga Damaannada Dheeriga ah (SSI)
- Taakuleynta Carruurta ama masruufka xaaska
- Dheefaha waddada-tareenka
- Dakhliga kirada
- Shaqo ka fadhiisashada ama magdhowga
- Maamulka Ciidamada Hawlgabka ah (VA) ama dheefaha militeriga
- Shaqada iyo Warshadaha (L&I)
- Ammaanadaha
- Dulsaarka / Saamiga Faa'iidada

NOOCA DAKHLIGA LA KASBADEY	KUMAA DAKHLIGA HELAYA?	XADDIGA BIL KASTA EE GUUD
		$
		$
		$
		$

VI. Kharashaad Bille ah

KIRO	DEYN GURI	KIRADA GOOBTA	CAYMISKA MULKIILAYAASHA GURYAHA	CANSHUURAHA HANTIDA MAGUURTADA AH	UJUURROOYINKA KALE
$	$	$	$	$	$

Waa maxay adeegyada (korontada, gaaska iwm.) uu lacagtooda bixiyo reerkaaga oo gaar ka ah kirada ama deynta guriga?
☐ Kulayl (Koronto/Gaas) ☐ Koronto (Aan Kulayl Ahayn) ☐ Biyo ☐ Telefoonka Guriga/Gacanta ☐ Bulaacada ☐ Qashinka

Qof kale ama hay'ad, sida guryeynta la kaabo, ayaa iga caawiya bixinta midkood dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadkan: ☐ Haa ☐ Maya Haddii ay haa tahay, waa kuma: _____Waa kharashaadkee: _____
Xaddiga ay bixiyaan: $ _____

☐ Waxaan helay lacag-bixinta Xeerka Gargaarka Tamarta Guriga Dakhligiisa Hooseeya (LIHEAA) 12kii bilood ee la soo dhaafey.

Aniga, xaaskeyga, ama qof reerkeyga ka tirsan ayaa bixiya ama waxaa looga baahan yahay in ay bixiyaan (calaamadee dhammaan kuwa ku habboon):

☐ Daryeelka ay Carruurta ama Dadka Waaweyn Ku Tiirsan Yihiin (oo ay ku jiraan kharashaadka gaadiidka)	Xaddiga bil kasta: $	Kumaa bixiya:
☐ Biilasha caafimaadka loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah ama da'doodu tahay 60 + (oo ay ku jiraan kharashaadka gaadiidka iyo lacagaha joogtada ah ee caymiska caafimaadka)	Xaddiga bil kasta: $	Kumaa bixiya:
☐ Taakulaynta carruurta (ku lifaaq caddeynta)	Xaddiga bil kasta: $	Kumaa bixiya:

Haddii aadan soo sheegin wax ka mid ah kharashaadkaasi kor ku xusan, waxaan tani u tixgelin doonaa in uu yahay bayaanka reerkaaga uu sheegay ee ah in aanu rabin in laga jaro kharashkan.

MAGACA CODSADAHA	LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA

VII. Wakiilka Idman

Wakiilka Idman waa qof aad u oggolaatey in uu DSHS kala hadlo dheefahaaga. Waxaad magacaabi kartaa qof, laakiin qasab ma ahan in aad magacowdo. Ma leedahay Wakiilka Idman? ☐ Haa ☐ Maya
Qofkan ma mas'uulkaaga sharciga ah baa? ☐ Haa ☐ Maya
Waxaad u baahan kartaa in aad buuxiso foomka Wakiilka Idman (DSHS 14-532).

MAGACA	XIRIIRKA	LAMBARKA TELEFOONKA

CINWAANKA BOOSTADA	MAGAALADA	GOBOLKA	KOODHKA DEGAANKA

Diiwaangelinta Cod-bixiyaha

Waaxdu waxaa ay bixisaa adeegyada diiwaangelinta codbixiyaha, oo ay ku jiraan diiwaangelinta codbixiyaha ee otomaatiga ah. **Codsashada isku diiwaangelinta ama diidista isku diiwaangelinta in la codeeyo ma saameyn doonto adeegyada ama xaddiga dheefaha ee aad ka heli karto hay'addan.** Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha, waan kaa caawin doonnaa. Go'aanka ah haddii la raadinayo ama la aqbalayo caawimaada waa mid adiga kugu xiran. Waxaad si gaar ah u buuxin kartaa foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha. Haddii aad aaminsan tahay in qof uu soo farogeliyay xaqa aad u leedahay in aad isku diiwaangeliso ama diido in aad isku diiwaangeliso in aad codeyso, xaqa aad u leedahay asturnaanta ee go'aansashada haddii aad isku diiwaangelinayso ama codsaneyso in aad isku diiwaangeliso codeynta, ama xaqa aad u leedahay in aad doorato xisbigaaga siyaasadeed ee gaarka ah ama dookhaaga siyaasadeed, waxaad cabasho u soo gudbin kartaa: Washington State Elections Office PO Box 40229, Olympia, WA 98504-0229 (1-800-448-4881).

Ma doonaysaa in aad isku diiwaangelisid in aad codeysid ama in aad cusboonaysiisid diiwaangelintaada cod-bixiyaha? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aadan calaamad sax ah saarin ama dooran sanduuqyada midkoodna, waxaa laguu tixgelinayaa in aad go'aan ku gaartay in aadan isku diiwaangelin in aad codeysid waqtigaan, haddii aad u qalanto, oo aadan diiddin, diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatiga ah mooyaane**.**

Haddii aad calaamadeysay "Maya" ee kore mooyaane, waxaad xaq u yeelan kartaa diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatiga ah. Waxaad xaq u leedahay diiwaangelinta cod-bixiyaha otomaatika ah haddii aad jiri doonto ugu yaraan 18 sano jir doorashada xigta, aad tahay muwaadin u dhashay dalka Mareykanka, oo DSHS ay hayso magacaaga, cinwaankaaga degaanka iyo boostada, taariikhdaada dhalashada, xaqiijinta macluumaadka muwaadinnimada, iyo saxiixaaga oo caddeynaya in uu run yahay macluumaadka lagu bixiyay codsigan.

Ma doonaysaa in si otomaatik ah laguu diiwaangeliyo si aad u codeyso? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aad calaamadeysay sanduuqa "Haa," ama aadan calaamadeyn sanduuqyada midkoodna oo aadna ka soo baxdo shuruudaha xaq-u-yeelashada diiwaangelinta cod-bixiyaha, DSHS waxaa ay macluumaadkaaga u diri doontaa Xafiiska Wasaaradda Arrimaha Dibadda ka-dibna si otomaatik ah ayaa laguu diiwaangelinayaa si aad u codeyso.

Baaqa iyo Saxiixyada (Halka hoose saxiix si aad codsigaaga u dhammeystirto.)

Waxaan fahamsanahay in aan ku khasbanahay:

- In aan bixiyo macluumaad sax ah iyo in aan raaco shuruudaha ka-warbixinta.
- In aan bixiyo caddeynta in aan xaq u leeyahay.
- U qoondee xuquuqaha qaarkood taakuleynta carruurta, Gobolka Washington marka aan qaato Gargaarka Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF). Haseyeeshee waxaan DSHS weyddiin karaa in aysan raadin taakuleynta carruurta haddii ay halis gelinayso aniga ama carruurteyda.
- In aan iskaashi ka sameeyo shuruudaha shaqo ee gargaarka cuntada.

Haddii aanan waxyaabahan sameynin, waxaa la ii diidi karaa dheefo ama waxaan ku khasbanaan karaa in aan dib u siiyo lacagtooda.

Waxaan fahamsanahay in dacwad dambiyeed la igu soo oogi karo haddii aan si ula kac ah u bixiyo warbixin been-abuur ah ama aanan soo sheegin waxyaabo ay ahayd in aan soo sheego.

Waxaan u oggolahay DSHS in ay la xiriirto shakhsiyaadka ama hay'adaha kale marka ay lagama maarmaan noqoto si ay iiga caawiso in aan helo caddeynta in aan xaq u leeyahay.

Waxaan akhriyay ama waxaa la ii sharxay xuquuqaheyga iyo mas'uuliyadaheyga waxaanna helay nuqulka Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha Macmiilka, DSHS 14-113. **Waxaan caddeynayaa ama qirayaa si waafaqsan ciqaabta been-ku-dhaarashada iyo shuruucda Gobolka Washington in macluumaadka aan codsigan ku bixiyay, oo uu ku jiro macluumaadka khuseeya jinsiyadda iyo xaaladda shisheeyaha ee xubnaha codsanaya dheefaha, in ay yihiin kuwo run ah oo sax ah.**

Haddii aad codsaneyso gargaarka lacag kaash ah, dhammaan dadka waaweyn (ama wakiillada idman) ee reerka waa in ay saxiixaan.

Gargaarka cuntada, labadaba codsadaha iyo wakiilka idman waa in ay saxiixaan haddii uu jiro dokumentiga wakiilka idman oo hadda galka ku jira mooyaane.

SAXIIXA CODSADAHA (LOO BAAHAN YAHAY)	TAARIIKHDA	MAGACA DAABACAN EE CODSADAHA	MAGAALADA IYO GOBOLKA LA SAXIIXAY
SAXIIXA CODSADAHA KALE EE QAANGAARKA AH	TAARIIKHDA	MAGACA DAABACAN EE QAANGAARKA KALE	MAGAALADA IYO GOBOLKA LA SAXIIXAY
SAXIIXA CAAWIYAHA AMA WAKIILKA	TAARIIKHDA	MAGACA DAABACAN EE CODSADAHA	MAGAALADA IYO GOBOLKA LA SAXIIXAY
SAXIIXA MARKHAATIGA HADDII LAGU SAXIIXAY "X"	TAARIIKHDA	MAGACA DAABACAN EE MARKHAATIGA	